[redacted]


# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad — Muqdisho, 18 Maajo 1976. — L. 2 R. 5

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


## KOOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

W. M.

### BOGGA KOWAAD

### XEER


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 8 Maajo 1976, L. 49 — *Dhismaha Safaaradda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ee Hindiya* — Bogga 319

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 3 Maarso 1976, L. 50 — *Shaqo ka fadhiisad Xiddigle Maxamed Saalax Samantar iyo Xiddigle Cabduullaahi Sheekh Cabdi* — » 320

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 2 Maajo 1976, L. 51 — *Dallacaad Dhamme Maxamed Jaamac Cali oo ka tirsan Ciidanka Boliiska* — » 321



Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 29 Maarso 1976, L. 52 — *Qaadid guri dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Cali Maxamed Axmed oo ay la wareegtay Wasaaradda Hawlaha Guud kuna ag yaal Xarunta Wasaaradda* » 322

XEER WASAARADDA GANACSIGA, 30 Maajo 1976, L. 52/Bis — *Iskaashatada Ganacsiga «Soo-Dhawow»* » 324

---

## EOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAAARDDA HAWLAHA GUUD, 9 Maajo 1967, L. 101 — *Ogeysiis Naada dhul Cali Maxamed Hiraabe* » 325

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 9 Maajo 1976, L. 102 — *Ogeysiis Naada dhul Xasan Siyaad Xuseen* » 326

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 9 Maajo 1976, L. 103 — *Ogeysiis Naada dhul Maxamed Cali Maxamed* » 327

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Maajo 1972, L. 104 — *Ogeysiis Naada dhul Cabdullaahi Nuur Guuleed.* » 328

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Maajo 1976, L. 105 — *Ogeysiis Naada dhul Qaasim Aadan Guuleed* » 329

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Maajo 1976, L. 106 — *Ogeysiis Naada dhul Caasha Maxamed Nuur* » 330

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Maajo 1976, L. 107 — *Ogeysiis Naada dhul Axmed Xasan Hilowle* » 331

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Maajo 1976, L. 108 — *Ogeysiis Naada dhul Cumar Maxamed Hilowle* » 332

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 8 Maajo 1976, L. 109 — *Ogeysiis Naada dhul Liibaan Maxamed Ibraahim* » 333

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 12 Maajo 1976 L. 110 — *Lumidda Buugga Keydka L. 772 oo ku qoran Saciid Maxamed Sheekh Axmed* » 334

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 18 Abriil 1976, L. 111 — *Lumidda Buugga Keydka L. 229 4 oo ku qoran Caddaawe Cali Shooble oo ay ku qoran tahay lacag dhan 6.155* » 335

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29 Maarso 1976 L. 112 — *Lumidda Buugga Keydka L. 9059, oo uu ku qoran yahay Axmed Maxamed Ismaaciil lacagta ku qoranna ay dhan tahay 4800* » 336

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 24 Febraayo 1976, L. 113 — *Lumid Buugga Lacagta. L. 10643, oo ay ku qoran tahay lacag dhan 6467 ee Maxamed Jaamac* » 337
SHIRKADDA KOJU, 22 Luulyo 1976, L. 113/Bis — *Ogeysiis shir caadi ah* » 338

---

# BOGGA KOWAAD
# X E E R

XEER L. 49, ee 8 Maajo 1976.

Dhismaha Safaaradda Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya ee Hindiya.

## GUDDOONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

AYADOO LA ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad oo 12ka Oktoobar 1969;

AYADOO LA ARKAY: Sharciga ay ku dhisan tahay Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya oo la socdo ruuxa kacaanka;

AYADOO LA ARKAY: Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda, lambarkiisu yahay 9 oo 8dii Sebtember 1971 iyo Sharciga lambarkiisu yahay 36 oo 26kii Abriile 1973 *(Foreign Service Law);*

AYADOO LA AQOONSADAY: Baahida loo qabo in laga furo Safaarad Soomaaliyeed Waddanka Jamhuuriyadda Hindiya;

AYADOO LA TIXGELINAAYO: Talooyinka ay soo jeedisay Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

## A M A R X E E R

### Qodobka 1aad

Waxaa la guddoomiyay in la furo Safaarad Soomaaliyeed saldhiggeedun aahaanayo Magaala-madaxda Delhi oo Jamhuuriyadda Hindiya.

### Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 8 Maajo 1976.

MADAXWEYNAHA G. S. K.
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 76*
*Muqdisho 13 Maajo 1976*
*Hantidhawrka Guud*
G.le Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

XEER L. 50, ee 3 Maarso 1976.
Shaqo ka fadhiisid Xiddigle Maxamed Saalax Samantar iyo Xiddigle Cabdullaahi Sheekh Cabdi

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 19aad xubinta 1aad xarafka (d) ee sharciga 14aad ee 4.1.1973 ee dhismaha Ciidanka Boliiska;

ISAGOO ARKAY: Sharciga 6 ee 31.12.1969 kuna saabsan xaqa iyo abaalgudka Ciidanka Qalabka Sida (Pension & Gratuity);

ISAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska kuna soo sheegay warqadaha SEC/GG/170, taariikhda 20.1.1976 iyo CIID/A/12-31, taariikh 27.1.1976;

ISAGOO AQOONSADAY: In Saraakiisha hoos ku magacaaban shaqada laga fadhiisiyo markii la oggolaaday arjiyadii ay ku weydiisteen.

ISAGOO DHAGEYSTAY: Ra'yigii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Saraakiisha hoos ku magacaaban oo ka tirsan Ciidanka Boliiska shaqada laga fadhiisiyo marka laga bilaabo taariikhda Sarkaal walba hortiisa ku qoran yahay, markii laga oggolaaday arjiyadii ay ku soo weydiisteen.

1. Xiddigle Maxamed Saalax Samantar - 2 Abriile 1976;
2. Xiddigle Cabdullaahi Sheekh Cabdi - 31 Maarso 1976.

Qodobka 2aad

Saraakiishaasi waxay xaq u yeelan doonaan wixii xaq ah ee uu siiyo sharciga 6 ee 31.12.1969 ee xaqa iyo abaalgudka Ciidanka Qalabka Sida.

Qodobka 3aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23 Maarso 1976.

XOGHAYAHA DAWLADDA EE
WASAARADDA ARR. GUDAHA
*(S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib)*

MADAXWEYNAHA G. S. K.
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 77*
*Muqdisho, 10 Maajo 1976*
*Hantidhawrka Guud*
G.le Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

XEER L. 51, ee 2 Maajo 1976.
Dallacaad Dhamme Maxamed Jaamac Cali oo ka tirsan Ciidanka Boliiska

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 23.12.1972, dhismaha Ciidanka Booliska;

ISAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliiska, kuna soo sheegay warqaddiisa lambar SEC/A/18/1 ee 22.2.1976;

ISAGOO TIXGELIYEY: Shaqadiisa wanaagsan kuna muujiyey kacaannimo, daacadnimo iyo dadaal xad dhaaf ah;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In marka laga bilaabo 1da Maajo 1976, la dallacsiiyey Dhamme Maxamed Jaamac Cali, oo ka tirsan Ciidanka Boliiska lana gaarsiiyey darajada ah Gaashaanle, oo uu ku muteystay shaqadiisa wanaagsan, kuna muujiyey kacaannimo, daacadnimo iyo dadaal xad dhaaf ah.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2 Maajo 1976.

XOGHAYAHA DAWLADDA EE
WASAARADDA ARR. GUDAHA
*(S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib)*

MADAXWEYNAHA G. S. K.
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 76*
*Muqdisho, 10 Maajo 1976*
*Hantidhawrka Guud*
G.le Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

XEER L. 52 ee 29 Maarso 1976.

Qaadid guri dan guud awgeed ee waqti hore u lahaa Cali Maxamed Axmed oo ay la wareegtay Wasaaradda H. Guud kuna ag yaal Xarunta Wasaaradda.

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ANNAGOO ARAGNAY: Warqaddii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Sebtember 1973;

ANNAGOO ARAGNAY: Xeer Dawladeed lamb. 10.936 Rep. taariikhdu markay ahayd 19.7.1935, taas oo lagu siiyay FELICE ENRIKO cad dhul ah oo ay ujeeddadiisu tahay dhis, ku yaal Muqdisho - Viale Lido;

ANNAGOO ARAGNAY: Qoraal (Atto) lamb. 1987 Rep. taariikh 28.2.1956, lagu diiwaan geliyay Xamar 6 Maarso 1956 al n. 209 Atti Pubblici Vol. VII, oo ah caddeynta Notaayada Avv. Mario Ciotola taas oo Granelli Neo - Gino oo u ah wakiil Migliorino Antonio. wuxuu ka gaday kuna wareejiyay CALI MAXAMED AXMED wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan gurigaas, kuna yaal Muqdisho - Viale del Lido;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda qiimaynta Guriga oo ay soo sameeyeen Guddi loo xilaaray kana kooban: Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G., Inj. Ibraahim Cige Maydhane, Inj. Cabdikariim Cige Guuleed iyo Sahamiye Awees Sheekh Maxamed taasoo muujinaysa qiimaha Guriga in uu yahay lacag dhan Sh. So. 146.896,20, hase yeeshee laga jaray qiimaha lacagtaas qiima dhac ahaan Sh. So. 44.068,86 oo u dhiganta 30% qiimaha asalka ee guriga, sidaasna qiimaha dhammaadka noqday lacag dhan Sh. So. 102.827,34;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda lamb. yahay WHG/3/23|63 taariikhdeeduna tahay 17 Febraayo 1976 oo ka soo baxday Wasaaradda Hawlaha Guud toosna u socotay Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, kana muuqdo in qiimaha Guriga lala gorgortamay wakiilka ka socda qofka guriga laga hadlaayo iska leh, heshiisna leyska gaaray labada dhinac in qiima gurigaas ay ku qaadato Dawladda lacag dhan Sh. So. 95.000 (Sagaashan iyo shan kun) kana tanasulay lacagtii hore, isagoo raalli ku noqday codsiga ka yimid Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud, heshiiska isaga ah waxaa laga ansaxiyey Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda, eeg warqadda lamb. GSK/S/15/A - taariikhdeeduna tahay 3 Maarso 1976;

ANNAGOO TIXRAACEYNO: Go'aanka ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda (eeg warqadda lamb. GSK/S/15/A - 310 taariikhdeeduna ahayd 3 Maarso 1976, waxay isku waafaqeen in guriga lala wareego wixii qiima ah ee uu astaahilana la siiyo qiimeyn tagnika ah dibadeed;

## XEER

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud awgeed guriga uu lahaa Cali Maxamed Axmed, iyadoo loo celinayo magdhow gaaraya Sh. So. 95.000 (Sagaashan iyo shan kun). Sida ka muuqata qoraalka rasmiga ah oo kor ku tilmaaman ama lagu fahfaahiyey.

Lacagta kor ku qoran waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Wasaaradda Maaliyadda.

Muqdisho, 29 Maarso 1976.

XOGHAYAHA DAWLADDA
WASAARADDA MAALIYADDA
*(Dr. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi)*

XOGHAYAHA WASAARADDA
HAWLAHA GUUD
*(Inj. Maxamed Xawaadle Madar)*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 8*
*Muqdisho, 3 Abriil 1976*
*Hantidhawrka Guud*
G.le Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur .

XEER L. 52/Bis ee 30 Maajo 1976.
Iskaashatada Ganacsiga «SOO-DHAWOW».

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4.10.1973.

ISAGOO ARKAY: Arji uu soo qoray Guddoomiyaha Iskaashatada Ganacsiga ee la magac baxday «SOO-DHAWOW ee Degmada W/Weyn;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada W/Weyn iyo kan Gobolka Sh. Hoose.

## AMAR XEER

### Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga «SOO DHAWOW» ee saldhiggeedu yahay magaalada W/weyn, shaqadeeduna tahay Ganacsiga Alaabta Dhismaha Deg. W. Weyn, waxaa laga diiwaan geliyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taasoo waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga lam. yahay 40ka oo dhanqn galay 4.10.1973.

### Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta xeerkani lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Iskaashatada Gañacsiga Alaabta Dhismaha «SOO-DHAWOW» ee Degmada W. Weyn waxay yeelanaysaa aqoonsi gaar ah oo Sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqan gelayaa.

Muqdisho, 30 Maajo 1976.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*(Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud)*

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Dawladda Hoose ee Degmada Kismaayo

---

*N A A D A D H U L*

O G E Y S I I S

Waxaa dhammaan la ogeysiinayaa dadweynaha deggan degmada Kismaayo in taariikhdu markay ahayd 11.7.1962 uu Jaalle Cali Maxamed Hiraabe sida xeerku yahay na soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Kismaayo xaafadda Far-janno qaabkiisuna yahay afar-gees siman, addimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Islaw Mahadow.

Koonfur waxaa ka xiga: Cali Nuunow.

Galbeed waxaa ka xiga Waddada laamiga ah.

Bari waxaa ka xiga Waddo yar.

Sidaas awgeed qof allaale qofkii doonaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshaddiisa Xafiiska Dawladda Hoose ee degmada Kismaayo, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (Soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta taariikhdu ay tahay 26.8.62 ilaa 27.9.62 muddadaas inta u dhexeysa oo ay rasmi ahaan ugu dhegganaan doonto naadada dhulku looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose ee degmada Kismaayo.

Kismaayo, 28 Setember 1962.

COMMISSARIO DISTRETTUALE

*(Cabdi Mire Nuur)*

*(101)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Dawladda Hoose ee Degmada Afgooye

*N A A D A   D H U L*

O G E Y S I I S

Waxaa dhammaan la ogeysiinayaa dadweynaha deggan degmada Afgooye in taariikhdu markay ahayd 14.12.1964 uu Jaalle Xasan Siyaad Xuseen sida xeerku yahay na soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Afgooye oo qaabkiisu yahay rektangolaar addimihiisu yihiin 20x10+10x6 kuna fadhiya 260/Mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Barxad (Piazza).

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dawladeed iyo dukaamo.

Bari waxaa ka xiga: Dhul dawladeed iyo dukaamo.

Sidaas awgeed qof allaale qofkii daneynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshaddiisa Xafiiska Dawladda Hoose ee degmada Afgooye, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta taariikhdu tahay 28.9.1968 oo lagu soo dhejiyey looxa ogeysiiysada ee Dawladda Hoose ee Afgooye ilaa 28.10.68.

Afgooye, 30 Oktoobar 1968.

COMMISSARIO DISTRETTUALE
*(Yuusuf Xaaji Cabdi)*

*(102)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Dawladda Hoose ee degmada Dhuusa-mareeb

*NAADA DHUL*

OGEYSIIS

Waxaa dhammaan la ogeysiinayaa dadweynaha deggan degmada Dhuusa-mareeb in taariikhdu markay ahayd 28.2.76 uu Jaalle Maxamed Cali Maxamed sida xeerku yahay na soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Dhuusa-mareeb xaafadda Dayax ama jidka hore ee Xamar iyo Gaalkacyo, dhulkaasoo qaabkiisu yahay rektangolaar addimihiisu yihiin 30x14 kuna fadhiya 420 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Cismaan Kaariye.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada laamiga ah ee Xamar B. Weyne.

Galbeed waxaa ka xigta Aadan Xaaji.

Bari waxaa ka xiga: Waddada laamiga ah ee Xamar B.Weyne.

Sidaas awgeed qof allaale qofkii daneynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshaddiisa Xafiiska Dawladda Hoose ee degmada Dhuusa-mareeb waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga bilaabo maalinta ay taariikhdu tahay 25.12.75 oo lagu soo dhejiyey looxa ogeysiisyada ee Xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Kacaanka ee degmada Dhuusa-mareeb ilaa maalinta taariikhdu tahay 25 Jannaayo 1976.

Guddoomiyaha G. Kacaanka ee Deg. Dh.Mareeb
*Jaalle Maxamed Cabdulle Cali (Garjeex)*

*(103)*

## *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullaahi Nuur Guuleed, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahayd 24 Maarso 1976, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho xaafadda Hawl-wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar 27x15, fadhiya 405 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo yar oo 3 mt. ah

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maalintii lagu naadshey buugga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Maajo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Caydaruus C. Keenediid)*

*(104)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *NAADA DHUL*

Waxaa la ogeysiinayaa in Jaalle Qaasim Xaaji Aadan Guuleed, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahayd 3.5.76, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho, xaafadda Hodan oo leh qiyaas rektangolaar 30x20 kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 184K.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 210.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maalintii lagu naadshey buugga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Maajo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Caydaruus C. Keenediid)*

*(105)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Maxamed Nuur u soo qoratay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdu markay ahayd 17.5.75, ay ku weydiisaneysey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho, xaafadda Boondheere, oo leh qiyaas rektangolaar 18,30x17,30 kuna fadhiya 324,60 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul dawladeed.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maalintii lagu naadshey buugga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Maajo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Caydaruus C. Keenediid)*

*(106)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Xasan Hilowle, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdu markay ahayd 20.11.76 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho xaafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar 15x3,50 kuna fadhiya 25,50 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhulka horay loo siiyey.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.

Bari waxaa ka xiga: Dhul dad leeyahay.

Qofkii danaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maalintii lagu naadshey buugga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Maajo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Caydaruus C. Keenediid)*

*(107)*

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cumar Maxamed Hilowle, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdu markay ahayd 22.1.1976, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho, xaafadda Yaaq-shiid oo leh qiyaas rektangolaar 30x20 kuna fadhiya. 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Muumin Faarax.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Jen. Daa'uud.

Bari waxaa ka xiga: Abuukar Gacan-gaab.

Qofkii danaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maalintii lagu naadshey buugga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Maajo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Caydaruus C. Keenediid)*

*(108)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Liibaan Maxamed Ibraahim, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka, taariikhdu markay ahady 22.2.1968, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho, xaafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar 50 x 30, kuna fadhiya 1500 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 76K.

Galbeed waxaa ka xiga: g;L. 142/75 iyo 128/75 Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Seynab Xasan Maxamed.

Qofkii danaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maalintii lagu naadshey buugga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Maajo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Caydaruus C. Keenediid)*

*(109)*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga Ganacsiga Ummadda (eeg 8353), wuxuu ogaaday in ay shaqadiisa tahay;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 L. 2; lumidda Buugga Keydka lam. 772 ku qoran Saciid Maxamed Sheekh;

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka oo ku qoran Jaalle Saciid Maxamed Sheekh Axmed oo sheeganaya inuu leeyahay ka dib markii ay 30 maalmood ka soo wareegato maalintii dekereetada lagu shaaciyo.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Sheekh Axmed ama qof isla asaga ka sita Wakiilad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee kor aan ku soo sheegnay.

Muqdisho, 12 Maajo 1976.

Guddoomiyaha Maxk. Gobolka Banaadir

*(Jaalle Cabdullaahi Daahir Barre)*

*(110)*

## GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga Ganacsiga Ummadda, Laanta 3aad (eeg warq. 0095) wuxuu ogaaday inay shaqadiisa tahay;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9/65 L. 2; lumidda Buugga Keydka lam. 229/4 ku qoran Caddaawe Cali Shooble oy ku qoran tahay lacag dhan Sh. So. 6.155.

### WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo buug cusub ninka la yiraahdo Caddaawe Cali Shooble oo ah qofka buugga ku qoran, ee aan kor ku soo sheegnay lumiddaas ka dib markay 30 maalmood ka soo wareegto maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga cusub ee la sameyn doono gacanto laga saaro Jaalle Caddaawe Cali Shooble ama qof isla asaga ka sita wakiilad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 18 Abriil 1976.

Guddoomiyaha Maxk. Gobolka Banaadir

*(Jaalle Cabdullaahi Daahir Barre)*

*(111)*

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG – GAALKACYO

GUDDOOMIYAHA MAXK. G. MUDUG (Gaalkacyo)

HADDUU ARKAY: Weydiintii Axmad Maxamed Ismaaciil, oo deggan Gaalkacyo taariikhdeeduna ahayd 2.2.76ka iyo Xaashida Bangiga Ganacsiga Ummadda, Laanta Gaalkacyo, taar.; tahay 24.2.76ka;

HADDUU ARKAY: Qodobka 69 DL. 1969 L. 2;

WAXAA CADDAATAY

In Jeegga Wareega ee lambar 9089 uu dhumay 31.12.75 kuna qoran tahay Sh. So. 4800 ee Bangiga G. Ummadda, Laanta Gaalkacyo.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku soo sheegnay muddo 15 beri ah ka bilaabata markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah, haddaan la helin cid sheegata, waana in gacanta laga saaro jaallaha magaciisu kor ku qoran yahay ama qof sita wakaalad sharci ah ayadoo la sugayo 15 beri.

Gaalkacyo, 29 Maarso 1976.

Guddoomiyaha Max. G. Mudug, Gaalkacyo

*(Cabdiraxmaan Sheekh Bashiir)*

*(112)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiskii Bangiga Ganacsiga Ummadda, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 L. 2;

### WUXUU CADDEYNAYAA

Lumidda buugga lacagta (Ammortamento libretto) NDR L. 10643, kuna qornayd lacagta 6468 Sh. So. uu leeyahay Jaalle Maxamed Cumar Jaamac.

### WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo buug cusub ninka la yiraahdo Maxamed Cumar Jaamac, muddo 30 beri ka dib, marka lag abilaabo maalinta amarkaan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, haddii aan qof kale wax ku soo sheegan buugga lacageed.

### WAXAA KALOO LA CODSANAYAA

In buuggaas gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay ama qof isla ninkaas ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo soddonka beri ee kor lagu soo sheegay.

Muqdisho, 24, Febraayo 1976.

Garsooraha Maxkamadda

*(Jaalle Cabdullaahi Daahir Barre)*

(113)

SHIRKADDA KOJU

## *UJEEDDO SHIR CAADI AH*

Xubnaha Shirkadda KOJU oo dhan waxaa la ogeysiinayaa in Shirka Guud ee Caadiga ah ee Shirkadda la qaban doono 14 Agoosto 1976, saacdduna tahay 7 habeennimo, isla markaasna waxa laga codsanayaa in ay ka soo qayb galaan Samileydu shirkaas oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Kismaayo.

Ajendada shirkaas waxay ka kooban tahay:

1) Wadahadallo ku saabsan Miisaaniyadda iyo oggolaanshadeeda sanadii 1975.

2) Haddii arrima kale oo ku saabsan shirkadda loo baahdo in laga hadlo.

Shirku hadduu maalintaa suuroobi waayo waxaa la qaban doonaa maalinta bishu tahay 16 Agoosto 1976, isku meeshii iyo isku saacaddii.

Kismaayo, 22 Luulyo 1976.

GUDDOOMIYAHA SHIRKADDA KOJU

*(113)/Bis*